



Daryeelka Xanuunka

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo

Ka Qaadidda Xanuunka (f.):

Si qofka u roonaado marka laga daweyyo calaamadaha cudurka



MNHPC

MINNESOTA NETWORK OF
HOSPICE & PALLIATIVE CARE

Daryeelka Xanuunka

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo

Maxay tahay daryeelka xanuunka? Daryeelka xanuunka (waxaa loogu dhawaaqaa pal-lee-uh-tiv) waa daryeel xoogga saara wanaajinta tayada nolosha dadka qaba cudur darran. Waxay ku kaalmeysa in ay ka soo roonaadaan calaamadaha iyo dhibka laga yaabo in uu la xariiro cudurka darran. Daryeelka xanuunka wuxuu kaloo taageero siiyaa qoyska iyo kuwa la jecel yahay.

Daryeelka xannunka ma yahay wax ii roon? Daryeelka xannunka wuxuu qof kasta ka kaalmeyn karaa xanuunka, dhibka, iyo calaamadaha kale ee la xariira cudurka darran. Daryeelka xanuunka waxaa la siin karaa da' kaasta iyo waqtii kasta uu qofka qabo cudur darran.

Maxaa loo yaqaan "cudurka darran"? Cudurka wadnaha, cudurka neefta, killida aan shaqeynin, Alzheimer, kansarada qaar, burburka ku dhaca murqaha iyo dareenka (amyotrophic lateral sclerosis) (ALS), iyo Parkinson's waa qaar ka mid ah tusaalooyinka, hase ahatee daryeelka xanuunka wuxuu qofka ka kaalmeyn karaa cuduro darran oo badan. Weydii takhtarka haddii daryeelka xanuunka kuu roon yahay adiga.

Yaa bixiya daryeelka fiyoobida? Daryeelka xanuunka waxaa bixiya koox ka tirsan takhaatiirta, kalkaaliyeyaasha iyo dadka kale ee daryeela sida shaqaalaha arrimaha bulshada, dadka ka shaqeeyo nafaqada, iyo farmashiisteyaasha. Kooxda waxay bixisaa taageero xoogga saara baahidaada gaarka ah.

Ma weydiisan karaa daryeelka xanuunka inta leyga daweynaayo cudurka ama xanuunka? Haa, waxaad heli kartaa daryeelka xanuunka inta aad qaadaneysid daweynta laga yaabo in ay kaa daweeysa ama soo celiso saamaynta cudurka.

La xariir MNHPC

Wac (651) 917-4616 ama booqo www.mnhpc.org gaad u baahan tahay kaalmo dheeraad ah oo ku saabsan sida loo helo bixiyeyaa ama haddii aad ka qabtid su'aalo guud oo ku saabsan daryeelka xanuunka lagu siiyo adiga ama kuwa aad jeceshahay.


Xaggee ayaan ka heli karaa daryeelka xanuunka?

Siyaabo badan oo kala duwan ayaad u heli kartaa daryeelka xanuunka. Gurigaada kaddib, waxaa dhici karto in daryeelka xanuunka ka qaadatid:

- Isbitaalada kooxaha daryeelka xanuunka
- Kliinikada daryeelka xanuunka bukaan socodka
- Hay'adaha daryeelka muddada dheer, sida nolosha la taakuleeyo
- Xarumaha kansarka

Maxay yahiin noocyada adeegyada aan ka filan karo daryeelka xanuunka?

- In aad la shaqeysid takhtarkaada si loo helo siyaabaha loo maamulo calaamadahaada si aad u roonaatid una noqtid qof madax banaan sida aad doontid.
- In aad la hadashid takhaatiirta iyo kalkaaliyeysasha si aad u baratid sida loo maamulo cudurkaada
- In aad la kulantid shaqaalaha arrimaha bulshada si loo helo siyaabaha aad xubnaha qoyska ama kuwa aad jeceshahay kala hadli kartid cudurkaada
- La hadalka kooxda si loo sameeyo qorshe ku dhisan waxa aad qadarisid iyo waxa aad rabtid adiga
- Si aad duugduugid ama daweynta muusikada uga heshid daweeyeyaal shahaadad haysta oo kaa kaalmeeya xanuunka iyo dhibka
- In aad heshid macluumaad ku saabsan sida loo helo kaalmada maaliyadda iyo sharciga, haddii loo baahdo.



Sodee ayuu daryeelka xanuunka noo kaalmeyn karaa Aniga iyo qoyskeyga?

Ujeedada daryeelka xanuunka waa in lagu kaalmeeyo adiga iyo qoyskaada si aad u dareentaan wanaag. Kooxda daryeelka xanuunka waxay daryeeshaa in ka badan baahidaada jirka. Kooxda waxay la shaqeysaa adiga, takhtarkaada, iyo qoyskaada:

- Si loo yareeyo xanuunka, neef yarida, daalka, caloosha fadhida, labbolabada, cunto xumada, niyad jabka, murugada, iyo dhibaatada lagala kulmo hurdada.
- Si adiga iyo kuwa aad jeceshay idinla siiyo taageerada caatifadda, nafta, ama diinta
- In idinla kaalmeeyo adiga iyo kuwa aad jeceshahay in aad fahamtaan xaaladaada iyo daryeelka aad xullatay
- In lagugu kaalmeeyo sida loo sameeyo qorshaha daweeynta ee la kulma waxa aad qadarisid iyo waxa aad rabtid
- In lagugu kaalmeeyo in aad fahamtid kuna shaqeysid gudaha siistemka caafimaadka.

Yaa bixiya daryeelka fiyoobida? Medicare Part B iyo Medicaid waxay ceymiyaan manaafacaadka daryeelka xanuunka. Sidaas oo kale ayay sameyaan qaar ka mid ah qorshooyinka ceymiska gaarka ah. Hubso in aad weydiisid shirkadda ceymiskaada haddii aad qabtid manaafacaadka daryeelka xanuunka. Xubinta ka tirsan daryeelka xanuunka ayaa kugu kaalmeyn karta su'aalaha maaliyadda ama arrimaha.

Sidee ayaan u heli karaa daryeelka xanuunka? Weydii: La hadal takhtarkaada una sheeg in aad rabtid in aad in badan ka ogaatid daryeelka xanuunka.

Ilaha Daryeelka Xanuunka

Shabakada Hooya Daryeelka iyo Daryeelka Xanuunka Minnesota (Minnesota Network of Hospice & Palliative Care) (MNHPC)
www.mnhpc.org/palliative-care

Hel Daryeelka Xanuunka

www.GetPalliativeCare.org